

Baaritaanka COVID-19

1. Baaritaanka sheybaarka ee COVID-19 waa la heli karaa.
 - 1.1. Baaritaanada shaybaarka ayaa cadeyn kara fayruska sababa COVID-19 ee muunadaha neefsashada.
 - 1.2. Rochester, MN waa laga heli karaa Baaritaanka COVID-19.
 - 1.3. Baaritaanka waxaa lagu sameeyaa shay (swab) la geliyo sanko (nasopharynx).
 - 1.4. Natiijada baaritaanka waxaa la heli karaa 48 saacadood.
 - 1.5. Baaritaanka COVID-19 waa lacag la'aan dhammaan shakhsiyaadka u qalma.

2. Waxaa jira hannaan lagu heli karo baaritaanka COVID-19.
 - 2.1. Qof walba uma baahna in laga baaro COVID-19,
 - 2.2. Haddii aad xiriir dhow la lahayd qof la xaqiijiyey inuu qabo COVID-19 oo aad leedahay qandho, qufac, dhaxan ama jir xanuun ama neefta oo ku qabata, tag Goobta Shaybaarka Baaritaanka ee Waqooyi-Galbeed ee Mayo Clinic.
 - 2.3. Haddii aad qandheysan tahay ama aad leedahay astaamo cusub sida qufac, neefta oo ku qabata, dhaxan ama xannuun jirka ah, 48-kii saacadood ee la soo dhaafay, tag Shaybaarka Baaritaanka ee Waqooyi-Galbeed ee Mayo Clinic.
 - 2.4. Haddii aad dhowaan u safartay meel uu ku baahay ama uu ka socda baahinta bulshada ee COVID-19 oo aad isku aragtay astaamo, tag Shaybaarka Baaritaanka ee Waqooyi-Galbeed ee Mayo Clinic.
 - 2.5. Haddii natiijada baaritaanka hubaal noqoto, waxaa bukaanka la xiriiri doona adeeg bixiyaha Mayo Clinic ee qadka internetka. Haddii aadan koonto lahayn, waxaad heli doonta wacitaan taleefan.
 - 2.6. Haddii nadiitajada baaritaan ay tahay mid hubaal ah, adeege Mayo Clinic ayaa kula soo xiriiri doona.
 - 2.7. Hadaad taqaanid qof qaba astaamaha COVID-19, u sheeg iney is baaraan.

3. Waxaa diyaar kuu ah adeeg-bixiyahaada daryeelka caafimaadka.
 - 3.1. Baahiyaha caafimaad ee socda, ama haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah oo laxiriira xaaladaha caafimaad ee kale, wac adeeg-bixiyahaada aasaasiga ah.
 - 3.2. Su'aalaha la xiriira COVID-19, Bukaanka Mayo Clinic waxay soo wici karaan khadka kalkaalisada ee COVID-19, 507-293-9525. Bukaanka Xarunta Caafimaadka ee Olmsted (Olmsted Medical Center) waa inay soo wacaaan 507-292-7266.
 - 3.3. Haddii aad yeelato astaamo digniin oo degdeg ah, sida neefsashada oo ku dhibta, neefsashada oo xumaata ama dareenka inaad dhaceyso marka aad istaagtid ama aad kor fadhiisatid, waa inaad si degdeg ah u heshaa daryeel caafimaad adigoo wacaya 911 ama aadaya waaxda gargaarka degdega.

Goobaha baaritaanka COVID-19 ee Rochester

Mayo Clinic Waqooyi Galbeed goobta baaritaanka ee marinka gawaarida (Drive Thru)

4111 US-52 North

Isniinta ilaa Jimcaha, 9:30 am ilaa 5:00 pm

Sabtida iyo axadda, 10:00 am ilaa 4:00 pm

Bartamaha Magaalada Guggenheim Parking Lot 6 Goobta baaritaanka oon wiishka-lahayn (Ballan keliya)

222 3rd Ave SW

Isniinta ilaa Jimcaha, 9:00 am ilaa 4:30 pm

Goobta Baaritaanka Bulshada ee Graham Park

ee ku dow Goobta Carwada Degmada Olmsted ee Koonfur Bari Rochester

Graham Park, 1407 3rd Ave SE
Isniinta ilaa Jimcaha, 9:30 am ilaa 5:00 pm
Sabti iyo Axad 10:00 am ilaa 4:00 pm